

Ka kalu- meysiga Iswiidhan



SportFiskarna

Waxaa maalgeliyay Hay'ada Illaalada
Deegaanka Iswiidhan (Naturvårdsverket)

Ka kaluumeysiga Iswiidhan

Kaluumeysiga waa madadaalo iyo farxad waqtiisahaafin ah oo loogu raaxeysan karo sannadka oo dhan. Gudaha Iswiidhan, qof walba wuxuu leeyahay xaquuqaha banaanka, waxaana banaanka kajira waxa loo yaqaano allemansrätten (Xaqa Bulshadu Uleedahay inay Galaan). Xaquuqaan waa in loo dhawraa si masuuliyad kujirto.

Inkastoo xaquuqda gelitaanka aysan kordhin kaluumeysiga, way kuu fududeeyaan si aad adiga u gaartid kaluumeysiga biyaha iyo helida barta ku haboon. Xaquuqaahaaga iyo masuuliyadaha halkaan ayaa lagula sharaxay tallooyinka qaar ee wax ku oolka ah ee ka kaluumeysiga Iswiidhan oo kucad dastuurka dalka.

Xaquuqda Gelitaanka Bulshada waxay siisaa fursado wanaagsan ee masuuliyada madadaalada iyo dalxiiska hawada furan.



Xaquuqda Gelitaanka Bulshada

Gudaha Iswiidhan, Xaquuqda Gelitaanka Bulshada waxaa lagu diyaariyay sharciga. Waxaad ku isticmaali kartaa inta badan ee waqti ah ee aad ku jeceshahay banaanka haddiiba aadan carqaladeyn, waxyeeleyn ama baabi'in. Xasuusnoow in aad marwalba ka tagtid aaga sida aad u aragtid, ee ujeedada deegaanka dabiiciga ah iyo sida kuwa kale ay ugu raaxeysan karaan sidoo kale. Gudaha Iswiidhan, waa xadgudub in laga tago qashin. Marka aad ka tagtid goobta, horay u qaad dhammaan leenka qashinka kaluumeysiga iyo qashinka kale.

Sidoo kale sida carqalad la'aanta shimbiraha, xayawaanada duurjoogta iyo dhirta, waa muhiim in laga fakero dadka kale ee kugu haraareysan. Ku dhaqan ixtiraam iyo tixgelinta markii aad u dhowdahay guriga oo ha gelin beerta qof walba.

Marnaba ha qaadin wadada haddii ay jirto halista ku sababida waxyeelada dhulka, sida halka miraha ay ku korayaan ama loogu daray. Tani waa xadgudub, taas oo ah xadgudub dambi sida waafaqsan sharciga Iswiidhish.

Waad ku dhawaan kartaa dagayga ama xe-bta oo waqti gaaban, dagayga lagu siiyay ma isku darto dhulalka guriga qofkale oo aadan ku jirin wadada milkiilaha dhulka.

Haddii aysan jirin qol ku fillan oo dhoor idinka mid ah inay kaluumeystaan isla aaga, qofka tagay halkaas ayuu ka kaluumeysan karaa marka koowaad. Ixtiraam kaluumeysatada kale oo ka fogow baaxad ku haboon ee ka baxsan midba midka kale.



Haddii aad rabtid inaad dagtid dhinaca biyaha kaluumeysiga, halkaas ayaad ka taagan kartaa teendhadaada. Haddii aad tahay koox dad ah ama aad rabtid inaad halkaas joogtid wax ka badan hal habeen, weydii milkiilaha dhulka ogolaanshaha.

Xaquuqaha gelitaanka bulshadu wuxuu kordhiyaa isticmaalka doomaha sidoo kale. Xasuuso inaad dan carqaladeyn dadka kale iyada la sameynayo qeylo aan muhiim aheyn ama hirar sareeyo. Markii aad isticmaaleysid doon, waxaa lagaa filanayaa inaad ogaatid sharciyada iyo xeerarka quseeyo wadada biyaha ee aad saarantahay.

Ka duwan taraafika doonta, xaquuqda gelitaanka waxay ku xadidantahay baabuurta dhulka. Xaquuqda Gelitaanka Bulshada ee caadi ahaan siiyaa xaquuqda gelitaanka cagaha. Marwalba ixtiraam inaad laheyn xaquuqda loogu ka xeynayo wadooyinka gaarka ah oo xasuuso in nooc walba ee kaxeeyta wadada ka baxsan lama ogolo.


Ku ka xeynta haraha barafka ku daboolan waa la ogolyahay, laakin xaquuqda sidaas lagu sameynayo waa la xadeyn karaa haddii aaga ay caan ku tahay ciyaaraha barafka, kaluumeysiga barafka iyo howlaha kale ee banaanka.

Xeerarka taraafikada ee wadooyinka dhulka sidoo kale way quseeyaan markii aad ku kaxeeyneysid “wadooyinka qaboo-baha” ee barafka.


Biyaha kaluumeysiga

Haddii aad tahay Iswiidhish ama aadan aheyn, waa lagu ogolyahay inaad lakaluumeysatid, tusaale ahaan. kaluumeysiga usha, xariga iyo makaadinta, ee xeebta Iswiidhan iyo haraha Vättern, Vänern, Mälaren, Hjälmaren iyo Storsjön ee gobolka Jämtland (ee aad ku aragtid qariirada).

Haddii aad rabtid inaad ka kaluumeysatid meel kale, ee loo yaqaan biyaha gaarka ah, waa inaad hubisaa haddii kaluumeysiga la ogolyahay oo kadib weydii milkiilaha xaquuqaha kaluumeysiga oo ogolaansho ah. Waxaad u iibsan kartaa shatiga kaluumeysiga haro badan oo kala duwan iyo wadooyinka biyaha www.fiskekort.se iyo www.ifiske.se.



Xariga kaluumeysiga sahlan



Marwalba xasuuso markii aad isku dayeysid in usha qoyso xarigaaga ka hor inta aadan u jiidin si dhuuqsan!

Qaababka kaluumeysiga

Qaab walboo kluumeysiga aad isticmaashid, waa muhiim in la xasuusto in aan la qaadan kaluun ka badan inta aad u baahantahay! Haddii aad rabtid inaad haysatid kaluunka, isla markiiba dil oo ku hay meel qabow illaa aad ka karisid. Warbixinta ku saabsan cabirada ugu yar iyo qabashada xadeynada waxaa laga heli karaa

www.svenskafiskeregler.se.

Kaluumeysiga makaadinta

Kaluumeysiga makaadinta way sahlanaan kartaa ama waxay noqon kartaa caqabada sida aad rabtid. Qalabka kaluumeysiga muhiimka ah waa ul, xarig, quusiye iyo makaadin. Saar quusiyaha si markaas shabaagtu hoos u aado illaa dusha laga arki karo korka sagxada biyaha. Markii aad aragtid sabeeeyaha inuu ku lumo hoosta sagxada, usoo jiid xariga dhinaca kore si aad ugu saxdid makaadinta afka kaluunka.

Waxaad isticmaali kartaa gooryaan, tixiri, tixsi buul, galey macaan, bur, aragoosto, rooti ama gabal kaluun ah sida dabinka.



Kaluumeysiga Spin

Kaluumeysiga Spin wuxuu ku lugleeyahay hilibka caaga iyo gilgilida si sidaas awgeed kaluunku way weeraraan dadka. Kaluumeysiga spin waa qaab lagu xisaabtamo ee ku dhawaantii dhammaan harooyinka.

Waad isticmaali kartaa noocyo badan ee caarooyinka ee kaluumeysiga spin, sida wareejiy- ayaasha, gooryaanka qaadada, wareejiyayaasha iyo caaga hilibka.

Spinners wuu sahlanyahay in ay tuuraan oo waa caaro wanaagsan oo noocyo badan ee kaluun ah. Kaluunka ee qoto dheeri kala duwan iyo iskudayida gilgilida ee xawaaraha kala duwan.

Kaluumeysiga barafka

Kaluumeysiga barafka waxaa lagu sameeyaa haraha barafeysan, caadi ahaan iyada oo la isticmaalayo bir culus ama makaadinta caaga hilibka.

Qodida godka ee barafka, xariga haka baxo illaa aad ka dareentid hilibka caaga uu dhufto hoosta oo kadib gigilo qiyaastii shan senti- miitir. Kadib xariga si tartiib ah u jiid qiyaastii shan ilbiriqsi oo walba illaa aad heshid kaluun.

Haddii aysan jirin wax howsha oo waqti ah, hilibka caaga hatago hoosta dhoor jeer, ama waxyar si sahlan u qod god cusub oo iskuday nasiibkaaga halkaas.

Barafka wag inuu ahaadaa ugu yaraan toban sentimiitar qaraweyn si ay u noqoto badbaada oo lagu lugeeyo. Marnaba ha aadin barafka kaligaa. Marwalba xiro qalabka barafka, oo qaado baraf qaadaha iyo xarig dheer. Marwalba ku haay mobeelkaaga gudaha shandada biyaha celiyo.

6



Afar ka mid ah kaluunkeena ugu caansan

Perch

Waxaad ka kaluumeysan kartaa perch labadaba kuleelaha iyo qaboobaha adiga oo isticmaalayo qaab walba oo kaluumeysi ah. Waxaad inta badan ka heleysaa meesha u dhow qulqulka iyo cowska, dalagyada ka baxsan iyo afafka dooxooyinka. Perch waxaa lagu qaban karaa iyada oo la isticmaali karo gooryaanada, wareejiyayaasha, kaluunka caaga, caaga hilibka iyo birta culus.



Roach

Kaluunka u dhow xeebta, doorbiday halka ay ka jiraan qulqulka iyo cowska. U isticmaal gooryaan, rooti, tixiri, galey macaan ee makaadinta yar. Roach dhadhan ayuu leeyahay markii la qiiqiyo ama laga sameeyo kuuskuuska kaluunka.



Pike

Waqtiga ugu wanaagsan ee la kaluumeysto pike waa deyrta, qaboobaha, iyo gu'ga. Ka kaluumeysto meel u dhow shore cowska xeebta, ama meesha kabaxsan dalaga iyo dhagaxaanta ku soo dhaca biyaha hoose. Istimmaal qadooyin, kaluunka caaga, wareejiyayaasha iyo birta culus. Marwalba ku celi pikes weyn biyaha oo hubi haddii ay jiraan sharciyo walboo gaar ah ee biyaha halka aad ka kaluumeysaneysid.



Brown Trout

Brown Trout wuxuu ku yimaadaa qaabab badan waxay ku xirantahay deegaanka ay ku noolyihiin. Noocyada kaladuwan waxay kalayihiin sea trout, lake trout iyo river trout. Qoyska trout waxaa ku jiro trout-ka badda, trout-ka haraha iyo trout-ka baroonka ah. Qaabka ugu sahlan ee lagu qabto brown trout-ka waa isticmaalida goryaanka qaadooyinka, caagaga kaluunka ama daqsiyada. Waa suurtoagal in la kaluumeysto trout-ka badda inta lagu jiro gu'ga, deyrta iyo qaboobaha oo illaa xeebta. River Trout-ka waa madadaalo ku qabashadiisa gooryaanada.



Xaquuqda Gelitaanka Bulshada

www.allemansratten.se

Shatiyada kaluumeysiga

www.fiskekort.se

www.ifiske.se

Xeerarka

www.svenskafiskeregler.se

Xayawaanada marmarka oo illaalsan

www.havochvatten.se

Sharaxaadaha xiriirka ee dhammaan guddiyada maamulka

www.lansstyrelsen.se

Tallooyinka kaluumeysiga makaadinta

www.sportfiskarna.se

Badbaadada barafka

www.issakerhet.se



Sportfiskarna

Finansierat av Naturvårdsverket